

**Xeer-Sharci 6 Luulyo 1964, lamba. 8**

**Kordhinta muddada uu tilmaamayo Xeer lamba. 19 si loo dhiso xadka ugu badan ee canshuuraha, khidmadaha iyo waajibaadka loo oggol yahay in ay qaadaan Maamullada Degmooyinka.**

### **Madaxweynaha Jamhuuriyadda**

Markuu arkay qod. 63 ee Dastuurka;  
Markuu arkay sharciga 3 Juun 1962, lamba. 14 oo ku saabsan Nidaamka Xukuumadda Soomaaliya;  
Markuu arkay Sharciga 14 Agoosto 1963, lamba.19 ee Maamullada Degmooyinka;  
Markuu garwaaqsaday in, kadib markii uu dhacay Xeer-Sharci 20 Maayo 1964, lamba. 4 oo ku saabsan muddo kordhinta ku xusan xeer lamba. 14 Agoosto 1963 lamba.19 si loo qeexo xadka ugu badan ee cashuuraha iyo xuquuqaha dawladda hoose loo ogolyahay inay qaadaan, waa lagama maarmaan waana degdeg in la soo saaro xeerar cusub oo la xiriiro arrintan;  
Markuu Dhageestay Golaha Wasiirada;  
Isagoo ka duulaya soo jeedinta Wasiirka Arrimaha Gudaha;

### **Wuxuu Xeeriyay**

#### **Qod. 1**

Muddada ku xusan qod. 52 ee Sharciga 14 Agoosto 1963, lamba. 19 iyada oo la raacayo sharcigan, waxaa dawladda loo wakiishay inay caddeyso xadka ugu badan ee cashuuraha iyo xuquuqaha Maamullada Dawladaha Hoose loo oggolaaday inay qaadaan si waafaqsan qod. 30 ee sharciga kor ku xusan, waxaana loo kordhiyay muddada ilaa 31 Decembar 1964.

#### **Qod. 2**

Xeerkani waxa uu dhaqan gelayaa maalinta lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah waxaana loo diri doonaa Golaha Shacbiga si uu sharci ugu beddelo.

Muqdisho, 6 Luulyo, 1964.

**Aden Abdulla Cismaan**

Riisul Wasaaraha  
**Abdirizak Hagi Hussen**  
Wasiirka Arrimaha Gudaha  
**Abdulqaadir Mahamed Aden**